

Hor u dhac

Dabka kaymuhu wuxuu waxyeelli karaa tayada hawada dhulka baadiyaha ah iyo magaalada. Qaacu waxa laga yaabaa inuu waxyeello caafimaadka dadka.

Xaashidaani waxay bixisaa macluumaadka qaaca dabka kaymaha, siday wax u yeelli karto adiga iyo caafimaadka qoyskaaga, iyo waxyaallah aad samayn karto ama hoos ugu dhigi karto dhibta caafimaadka.

Waa maxay - Qaaca dabka kaymaha?

Dabka kaymuhu wuxuu ka kooban yahay walxo baaxad ahaan kala duwan, uumiga biyaha iyo gaasas, uu ku jiro kaarboon monoksaydh iyo nitrojiin oksaydh.

Walxaha waaweyn waa la arki karaa waxayna ka koobantaa haraa gubanaya, dhamac iyo wax la mid ah. Walxahaani waxay door ka qaataan aragtida 'muuqaal ciiro ku jirto' marka roobku da'ayo. Badanaa aad ayey u weyn yihiin in la jiido oo sanbabada la gaarsiyo laakiin waxay saamayn kartaa sanko, cunaha iyo sanbabada.

Is dhinac dhig ahaan, walxaha aadka u yar (1/30 ballaca timaha aadanaha caadiga ah) way sahlan tahay in la jiido gaasaska oo loo gudbiyo sanbabka wuxuuna waxyeelli karaa caafimaadkaaga.

Sidee dabka kaymuhu wax u yeellaa caafimaadkaaga?

Sida qaacu wax kuu yeello waxay ku xiran tahay da'daada, xaalladaada hore ee caafimaadka sida neefta ama jirada wadnaha, iyo inta qaacu ku gelayey.

Dadka caafimaadka qaba ee aan da'da ahayn si sahala ayuu ku dhamaadaa ka dib marka qaacu istaago. Calaamadaha dhibta qaaca waxaa ka mid ah indhaha oo ku cuncuna, cuna xanuun, sanko oo biyo kaa yimaadaan iyo qufac guud.

Carruurta, dadka waaweyn, sigaar-yacabyada iyo dadka leh xaallad caafimaad oo horay u jirtay sida xaallad wadne ama sanabab (iyo neefta) aad ayey walxaha yaryar oo la qaadanayaa u saameeyaan. Calaamaduhu waxa laga yaabaa inay qaataan waqti siyaada ah waana sii xumaan karaan.

Aad ayey muhiim u tahay in dadku in dadka qaba xaallad xaafimaad qaataan dawadooda, sii wataan qorshahooda daaweynta, una raadiyaan talo caafimaad haddii ay jiradaan.

Ka waran qaadashada maaskare?

Xaashida caadiga ah ee maaskarada habaaska, fasaleetiga ama bandannas ma celiyaan waxlaha aadka u yaryar badanaana kuma haboona inay difaacaan sanbabada.

Maaskarayaal khaas ah (oo loogu yeero 'P1' ama 'P2') ayaa ku haboon fiitaraaraynta qaaca dabka kaymaha. Waxaa laga helli karaa dukaamada agabka badankood guud ahaana waxay bixiyaan difaaca neefsiga walxaha yaryar.

Si kasta ha ahaatee, inta aadan go'aansan qaadashada maaskarada waa inaad samaysaa waxyaallaha soo socda:

- Waxay noqon karaan kulayl aan ku fiicanayn in la qaato
- Haddii lingaxa ku wareegsan wajigu iyo afku aanu fiicanayn
- (sida - ragga garka lihi ma helli karaan lingax fiican), maaskaradu ma aha wax ku ool fiican
- Maaskaradu ma ma fiitarayso gaasaska sida kaarboon monoksaydh
- Way kugu adkayn karaan inaad si aad caadi ah ugu neefsato, sidaas darteed qof walba oo qabay xaallad caafimaad oo wadnaha ama sanbabka waa inay raadsadaan talo caafimaad ka hor intaan la istimaalin, waana
- Fiican tahay in badanaa lagu jiro guriga, meel ka fog qaaca haddii aanay ahayn lagama maarmaan in aad banaanka ka shaqayso.

Taxadarka caafimaadka – maxaan samayn karaa?

Si hoos loogu dhigo dhibaato ku timaada caafimaadka waqtiga dabka kaymaha ka feker:

- Inaad yarayso inta aad samaynayso xarakaad guriga dibadiisa lagu samaynayo (jimicsigu wuxuu dhiirrigeliyaa in walxa badan loo diro sanbabada). Dadka qaba dhibaato caafimaad oo sanbabada ama weliba wadanaha, waa inay nastaan inta ugu badan kana fogaadaan qaaca.
- Markaad gudaha ku jirto, xir daaqadaha albaabkana xir.
- Haddii aad qabooyiye isticmaalayso daar oo taabo "recycle ama recirculate". Taasi waxay yaraynaysaa inta qaaca oo gudaha soo gelaya.

- Haddii gurigaagu aad u kululaado, ama hawada dibadu so gelayso, isku day inaad ka qaadata qaboojiyaha fasax dabadeedna aad maktabada ama shoobinsantarka agtaada ah tagto.
- Markaad gudaha ku jirto, iska ilaali meella kale oo hawa wasakhaysani ka imaan karto sida ugu dhaqsa badan, kaas waxaa ka mid ah qaaca sigaarka, qoryaha ama mushamac gubanaya, oo isticmaalaya qalabka gaaska ama walaqida habaas ka faakiyuum wax xaaqaya.
- Haddii fasax laga qaadanayo qaaca, ka faaiidayso inaad hawada ka saarto guriga si loo wanaajiyo tayada hawada.
- Qof kasta oo qaba dhibaato sanbabada ama wadnaha la xiriiirta waa inay guriga ku haystaan ugu yaraan 5 berri daawadii la qaadan lahaa. Kuwa neefta qabaa waa inay raacaan qorshahooda neefta.
- Qof kasta oo ay qabsato dhibaato neefsi ama xannuun shafka ah waa inuu raadiyaa talo caafimaad isla markiiba.
- Haddii aadan haysan qaboojiye, qaad talaabooyin lagu yarayn karo dhibta, khaasatan kuwa aad u yar, dadka iinta leh oo fiyoobayn, ama kuwa waayeelka ah. (u xawil xiriiirinta: http://www.health.vic.gov.au/environment/emergency_mgmnt/index.htm#bushfires macluumaad ku saabsan dhibta kulaylka iyo maaraynta dhibta a kulaylka). Wixii ku cusub oo ku saabsan dabka iyo qaaca dhegayso raadiyaha agtaada ah ama daawo telefishanka. La xiriiir khadka macluumaadka Dabka Kaymaha oo ah 1800 240 667. (TTY dadka dhegaha la' wac 1800 555 677, dabadeedna weydii 1800240 667).
- Marka qaaca xaalladiisu noqoto 'khatar' qof walbaa waa inuu ku nastaa guriga kana fogaadaa hawlaha intii karaankiisa ah. Cayaaraha guriga dibadiisa lagu qabto waa in dib loo dhigaa. Shakhsiyaadka sahalka wax ku dhibsada waa inay ka fekeraan inay u wareegi karaan meel aan qaac lahayn oo la joogaan ehel ama saaxiib.

Macluumaad intaas ka badan

Macluumaad caafimaad oo intaas ka badan iyo qaaca, la xiriir

- Qaybta Environmental Health Section ee golaha degmadaada, ama
- Unuga Environmental Health Unit ee wasaarada Adeega Aadamiga tel: 1300 761 874.
- Xaashiyaha kale ee xaqiiqada oo dabka kaymaha waxaa ku jira khataraha [Hazards on Your Property after a Bushfire](#) iyo [Advice for people with water tanks living in bushfire-affected areas](#).

Labada xaashiyood oo xaqiiqada waxaa laga soo bixi karaa:

www.health.vic.gov.au/environment/emergency_mgmnt/index.htm#bushfires ama waxaa laga helli karaa iyadoo la waco Environmental Health Unit of Department ee Human Services tel: 1300 761 874.